

Ballanqaadkayaga Beesha:

Cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital waxa u muddo dheer ku dhex yaallay beesha Koonfurta Minneapolis taasoo ka badan 138 sannadood. Dheeraad ka baro shaqadayada si loo caawiyo beesheena.

Hadda, beesheena waxa dhib ku haya saameynnada koronofayraska iyo waliba cadaalad-dara, sinaan-la'aanta iyo arrimaha ammaanka ee hortaagan xaafaddeena. Hadafkayaga in wax laga qabto dhibaatooyinka oo la bixiyo daryeel waa mid ka sii weyn intii u ahaa abid.

Marka annu bilawno fiicneynta cisbitaalkeena, ballanqaadkayaga Habka Dhammeystiran ee Fiicneynta (Whole Way to Better) waxa ku jira u-heelanaanta dariskayaga.

Waxa annu ballanqaadnay in la maalgaliyo goobta annu hadda degan nahay.

Sannadkii 2017, Allina Health waxay saxeexday 20 sanno oo lagu daray ijaarkayaga dhismaha Midtown Exchange, annaga oo sii wadna ballanqaadka annu u sameynay xaafadda Phillips. Si looga soo baxo baahiyaha isbeddelaya ee beesheena oo loo kordhiyo awoodayada in la bixiyo daryeel noocyo badan, waxa annu fiicneyn doonaa goobta cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital inta lagu jiro 10 sanno ee soo socda.

Waa annu xejin doonaa ballanqaadkayaga in annu ku eekaano bedka ama aagga goobtayada hadda.

Sannado badan ka-hor, waxa u cisbitaalka Abbott Northwestern wacad la galay xaafadda – kaasoo ah in aanaanu goobtayada ka balaadhin inta u hadda yahay xuduudkayagu. Waxa u cisbitaalka Abbott Northwestern sii xejin doonaa ballanqaadkayaga marka la sameynayo qorsheyaashayada horumarinta goobta ee mustaqbalka.



Waxa annu noqon doonaa daris ma'suuliyad leh oo u heelan in lagugu wargaliyo wixii ku saabsan mashruucyadayada.

Inta annu ka shaqeynayno fiicneynta cisbitaalkayaga, waxa annu ballanqaadaynaa in isgaadhsiin cad oo lala yeesho xaafaddayada laga dhigo mid joogto ah. Waxa annu bixin doonaa war jardiidsan oo ku saabsan mashruuca inta lagu jiro tallaabo kasta. Waxa ad warka ku heli karaa:



Inta ad soo wacdid
khadkayaga teleefonka
mashruuca oo ah: 612-
262-1010



Adiga oo barta
internetka ee
mashruuca u oo
booqda war jaldiisan



Adiga oo nagala socda
Twitter @ANWUpdates

Waxa kale oo annu ka shaqeyn doonaa in annu war jaldiisan ku bixino shirarka xaafadda iyo iyada oo la adeegsanayo wargeysyada xaafadda.



Madaxweynaha Abbott Northwestern Hospital, Ann Madden Rice, oo barnaamijka dib-u-hagaajinta goobta ku soo bandhigaysa shirkii sannadlaha ahaa ee Isbahaysiga Xaafadda Midtown Phillips Bishii Labaad ee 2020.



Mashruucyadayada waxa haga sii-jiritaan deegaan iyo sinaan.

Tilmaamaha Barnaamijka Dib-u-hagaajinta ee Goobta waxa ku jira:

- In la ixtiraamo dadka xaafadda Phillips iyo dhamman kuwa u saameyay cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital iyo Allina Health guud ahaan.
- In daryeelka bukaanka laga dhigo udub-dhexaadka dhammaan go'aamada.

- In la yareeyo saameynta deegaanka ee hawlaha cisbitaalka.
- In fursado shaqo loo abuuro beesha degmadeena iyada oo qandaraas lala galayo Minority & Women Owned Business Enterprises (WMBE) (Ganacsiyada Dadka Laga Tiro Badan Yahaya iyo Haweenka).



Dheeraad ka baro cisbitaalka Abbott Northwestern Hospital iyo ballanqaadka Allina Health ee beesha.